



**Si wadajir ah ayaan
u qorshayn doonnaa
sidii aad gurigaaga u
aadi lahayd**

Waxaan markaad isbitaalka timaadid kaddib xilli horeba sii bilownaa qorshaynta sidii markii aad gurigaaga aadaysid si amni ah oo la isku hubo isbitaalka uga bixi lahayd.

Iyadoo laga duulayo baahida aad u qabtid caawinaad ayuu isbitaalku wada shaqayn la yeelan doonaa:

- Degmada aad ku nooshahay
- Rugtaada caafimaadka
- Qaabilaadaada baxnaaninta
- Qaabilaadaada takhasuska gaarka ah

Wada shaqaynteen waxay ku dhisan tahay in aad oggolaatid in aan wadaagno warbixinaha iyadoo la adeegsanayo nidaam dhanka khadka kombuyuutarka ah.

Qorshayn

Muddada aad isbitaalka ku jirtid waxay shaqaaluhu ku weydiin doonaan waxyaalaha ay gurigaaga kaaga caawin karaan degmada, rugta caafimaadka iyo qaabilaadda baxnaaninta markii aad isbitaalka ka baxdid. Iyadoo laga duulayo waxa adiga iyo haddii uu jiro qof ehelkaaga ah noo sheegteen iyo warbixinta uu isbitaalku u gudbiyo degmadaada, rugta caafimaadka iyo qaabilaadda baxnaaninta, ayaa la samaynayaa qiimayn guud oo ku aadan caawinadda aad xaqq u leedahay.

Inta aadan guriga aadin ka hor waxaa kusoo wici kara shaqaale ka socda degmadaada ama rugtaada caafimaadka, si ay kugu qorsheeyaan caawinaad iyo dedaallo waxqabad. Haddii ay suurta gal noqon weydo in telefoonka go' aan looga gaaro dedaallada caawinaad waxaa dhici karta in kulan dhanka khadka kombuyuutarka ah la yeesho. Way fiican tahay qof aad ehel tihiin inuu ka qayb galo kulanka.

Haddii la qiimeeyo in aad u baahan tahay qalab caawinaad waxaa lagaa soo siinayaa isbitaalka ama qaabilaadda baxnaaninta ayaad ka heli doontaa markii aad guriga timaadid kaddib. Waxaad u baahan kartaa inaad wax ka beddeshid siday alaabta guriga kuu taal u yaalliin si aad boos ugu heshid qalabkaaga caawinaad iyadoo laga duulayo isbeddelka ku yimid baahidaada.

Qaabilaadda baxnaaninta ee aad dooratay:

Qof daryeele caafimaad ah oo si joogto ah loola xiriiro

Qofka daryeelaha caafimaadka ah ee sida joogtada ah loola xiriiro wuxuu ka qayb qaadanayaa qorshaynta iyo isku dubbaridka sii wadida daryeelkaaga iyo xannaanadaada isagoo la kaashanaya shaqaalaha isbitaalka iyo degmadaada iyadoo laga duulayo baahiyahaaga. Daryeelaha caafimaad ee sida joogtada ah loola xiriiro wuxuu joogaa rugtaada caafimaad ama xaruntaada takhasuska gaarka ah leh.

Magaca: _____

Shaqada: _____

Telefoon: _____

Markii aad isbitaalka ka baxaysid

Waxaa lagu siinayaa warbixin qoraal ah oo ka kooban:

- Soo koobid ku saabsan wixii dhacay muddadii aad isbitaalka ku jirtay.
- Liis ay ku qoran yihiin daawooyinka aad qaadan doontid.

Qorshe shaqsiyeed oo la isku dubbariday (SIP)

Muddo kaddib markii aad guriga timaadid waxaa dhici karta in loo baahdo in lasii wado qorshaynta sidii uu kusii socon lahaa qorshaha daryeelkaaga caafimaad iyo xannaano. Waxaa markaas dhici karta in loo baahdo in daryeelaha caafimaadkaaga sida joogtada ah ula socon doona uu ballan qabto ayadoo lagaa talo gelinayo. Kulankaas waxaa lagu dejin doonaa qorshaha isku dubbaridka shaqsiga ah (SIP) halkaas oo aad fursad u haysatid in aad saamayn ku yeelatid sida loo qaabaynayo dedaallada lagugu caawinayo.

SIP wuxuu noqon doonaa qorshahaaga aad kula socon doontid wixii go' aan lagu gaaray. Waxaad ogaan doontaa caawinaadda aad heli doontid, cid kasta waxay samaynaso iyo halka aad la xiriiri kartid. Waxaad warbixinta heli doontaa iyadoo qoraal ah.

VGRXXXXX





نخطط معاً لمغادرتك إلى المنزل



نبدأ مبكراً أثناء إقامتك في المستشفى بالتخطيط لكي تتم مغادرتك إلى المنزل بطريقة آمنة ومطمئنة.

يتعاون المستشفى مع كل من أدناه استناداً إلى احتياجاتك من الدعم:

- بلدية سكنك
- المستوصف
- عيادة إعادة التأهيل
- عيادة التخصصات الطبية

يعتمد تعاوننا على موافقتك على تبادل المعلومات عبر نظام تواصل رقمي.

التخطيط

سيقوم الطاقم خلال إقامتك في المستشفى بسؤالك عما تعتقد بنفسك أنك ستحتاج إليه من دعم في منزلك من بلديتك والمستوصف وعيادة إعادة التأهيل عند مغادرتك للمستشفى.

واستناداً إلى ما تقوله أنت وربما أقاربك، بالإضافة إلى المعلومات التي يقدمها المستشفى إلى بلديتك والمستوصف وعيادة إعادة التأهيل، يتم إجراء تقييم شامل لتحديد نوع الدعم الذي يحق لك الحصول عليه.

قد يتصل بك موظفون من بلدية سكنك أو من المستوصف التابع لك قبل مغادرتك للمستشفى، وذلك من أجل التخطيط للدعم والإجراءات المطلوبة.

إذا لم يكن من الممكن اتخاذ قرار بشأن إجراءات الدعم عبر الهاتف، فقد يكون من المناسب عقد اجتماع رقمي. من الجيد أن يكون أحد أقاربك حاضراً في الاجتماع.

إذا تبين أنك بحاجة إلى وسائل مساعدة، فإما أن تحصل عليها عند مغادرتك المستشفى أو عند وصولك إلى المنزل من خلال عيادة إعادة التأهيل الخاصة بك.
قد تحتاج إلى إعادة ترتيب الأثاث في منزلك لتوفير مساحة لوسائل المساعدة وذلك بما يتناسب مع احتياجاتك المتغيرة.

عيادة إعادة التأهيل التي اخترتها:

جهة الاتصال الثابتة في الرعاية الصحية

تشارك جهة الاتصال الثابتة الخاصة بك في تخطيط وتنسيق رعايتك ودعمك المستمر بالتعاون مع طاقم المستشفى وبلديتك، وذلك بناءً على احتياجاتك. تعمل جهة الاتصال الثابتة في المستوصف أو في عيادة التخصصات الطبية الخاصة بك.

جهة الاتصال الثابتة الخاصة بك في الرعاية الصحية:

الاسم: _____

المؤسسة: _____

رقم الهاتف: _____

عندما تغادر المستشفى

سوف تحصل على معلومات مكتوبة تحتوي على ما يلي:

- ملخص عمّا حدث أثناء وجودك في المستشفى.
- قائمة بالأدوية التي يجب أن تتناولها.

خطة فردية منسقة (SIP)

بعد فترة من عودتك إلى المنزل قد يكون هناك حاجة لمواصلة التخطيط لرعايتك ودعمك. عندها قد يُصبح من المناسب عقد اجتماع يدعوك إليه جهة الاتصال الثابتة الخاصة بك في الرعاية الصحية حيث يتم ذلك بالتشاور معك. يتم خلال الاجتماع إعداد خطة فردية منسقة (SIP) حيث تكون لديك الفرصة للتأثير في كيفية تصميم التدخلات.

تُصبح خطة SIP هي خطتك وهي موجودة لكي تعرف ما الذي تم الاتفاق عليه. يجب أن تعرف ما هو نوع الدعم الذي ستحصل عليه ومن الذي يقوم بماذا وإلى أين يجب أن تتوجه. سوف تحصل على هذه المعلومات كتابياً.





We plan your discharge together

Early during your hospital stay, we will start planning how to make your discharge safe and secure.

Depending on your need for support, the hospital will cooperate with your:

- home municipality
- healthcare centre
- rehab clinic
- specialist clinic

Our cooperation is based on your approval that we exchange information via a digital communication system.

Planning

During your hospital stay, the staff will ask you what you think you will need in terms of support in your home from your municipality, healthcare centre and rehab clinic when you leave the hospital. Based on what you and your family tell us, and on the information that the hospital provides to your home municipality, healthcare centre and rehab clinic, an overall assessment will be made concerning what support you are entitled to.

Before you leave the hospital, you may get a phone call from your home municipality or healthcare centre, to plan your support and assistance. If it is not possible to plan your support and assistance by phone, a digital meeting may be arranged. It is a good idea to let someone close to you participate in the meeting.

If you are deemed to be in need of assistive devices, you will either receive these at the hospital or from your rehab clinic when you come home. You may have to rearrange the furniture in your home to make room for your assistive devices due to your changing needs.

Your selected rehab clinic:

Permanent healthcare contact

Your permanent healthcare contact will participate in the planning and coordination of your continued care together with the hospital staff and your home municipality, based on your needs. Your permanent healthcare contact works at your healthcare centre or specialist clinic.

Your permanent healthcare contact:

Name: _____

Activity: _____

Phone: _____

When you leave the hospital

You will get written information including:

- A summary of what happened during your hospital stay.
- A list of which medicines you should take.

Coordinated individual plan (SIP)

Some time after you have come home, there may be a need for continued planning of your care. In this case, your permanent healthcare contact will invite you to a meeting after consulting you. At the meeting, a coordinated individual plan (SIP) will be established where you have the opportunity to influence how your care will be delivered.

SIP will be your plan where you can see what has been decided. You should know what support you will receive, who will do what and where to turn. You will get the information in writing.